



Fariintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Janaayo 5, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Bilawga Website-ka Shaqada ee Cusub



Ilaa in muddo ahba, nidaamkeena adeega ee naafanimada maskaxda iyo korriinku wuxuu dhibaato ku qabay awooda shaqaale ee uu leeyahay.

Tani kali kuma aan nihin. [Ra'yi ururinta xasiloona shaqaalaha NCI](#) ayaa muujinaysa in uu qaran ahaan jiro yaraanshaha Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah.

Iyada oo laga jawaabay codsiyada daneeyayaasha, ODDS ayaa bilawday [ImpactOregon.careers](#). Impact Oregon waa website-ka shaqada halkaasi oo daryeel bixiyayaasha ODDS iyo hay'adaha maamulka kiisku ay soo galin karaan shaqooyinka jira, kuwaasi oo lacag la'aan ah.

Marka lagu daro soo galinta, [Impact Oregon](#) wuxuu leeyahay qaybta sharraxaada shaqada, oo tilmaamaysa sida qaybtan shaqo ee sii kobcaysaa ay u leedahay meel ay ka sii korodho iyo fursad.

Shaqo raadiyayaasha gobolka oo dhan waxay isha marin karaan shaqooyinka jira iyada oo lagu saleynayo goobta, mushaharka iyo heerka waayo-aragnimo. Ololaha suuq-geynta gobolka oo dhan ka jira si loo gaaro shaqo raadiyayaasha guud ahaan Oregon ayaa la bilaabi doonaa

bartamaha Janaayo. Hadafku waa in la gaaro dadka reer Oregon ee niyad samida ku qaba caawinta dadka kale ee ay dhici karto in aysan ka warqabin in qaybteenan shaqo ay jirto. Waxaa sidoo kale laga helaa wax aynaan marnaba hore u haysanin, – oo ah meel dhexe si loo tilmaamo shaqooyinka la heli karo ee ka tirsan qaybta I/DD.

Daryeel bixiyayaasha iyo hay'adaha maamulka kiiska waxaa lagu dhiirigelinayaa in shaqooyinkaaga hadda soo dhajiyaan iyaga oo booqonaya <https://impactoregon.careers/> isla markaana codsadaan in ay galaan. Waxaad u baahan tahay oo kaliya Aqoonsigaaga isqorista daryeel bixinta ama eXPRS ID si aad u codsado in aad gasho.

Waan ognahay in aysan xalinayn arrimaheena dhanka shaqaalaha, balse waxaa rajeynaynaa in tani tahay qaab gacan ka geysanaya in dad badan loo shaqaaleysiiyo qaybteenan shaqo.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.